

Xarunta Gurmada ee Xaaladaha Degdegga ah Ee Gobolka si loo taageero codsiyada degmooyinka fatahaadda biyuhu ka dhacday

St. PAUL — Marka ay guryaha ama hantida kale ay khatar ku jirto ama la burburiyo, sida dhacday todobaadkii la soo dhaafay, kooxaha gurmada ee degaanka iyo mutadawiciin ayaa si aan loo kala harin uga hortaga bulshada.

Hase yeeshee, marka aanay ku filneyn gargaarka dawladaha hoose oo lagu dhawaaqo xaaladda gurmada degdegga ah ama masiibooyinka, waxa ay degmooyinku weydiisan karaan gargaar.

“Waxa aynu ogsoonahay in shaqaalaha gurmada ee degaanka iyo hogaamiyayaasha bulshada la imanayaan dadaal dheeraad ah xaaladaha gurmada degdegga ah,” ayuu yiri Kevin Reed, Maamulaha Waaxda Amaanka Dadweynaha Ee Minnesota Wasaaradda Arrimaha Gudaha Iyo Gurmada Degdegga Ah (HSEM). “Hawsha uu SEOC waa in ay la shaqeeyaan hogaamiyayaasha oo gaarsiyaan gargaarka gobolka halka looga baahan yahay.”

HSEM waxa ay ka jawaabeysaa codsiyada gargaarka iyada oo loo marayo Xarunta Maamulka Xaaladaha Gurmada Ee Gobolka (SEOC) iyo hay’adaha la shaqeeya:

- Waaxda Beeraha ee Minnesota
- Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Minnesota (MnDOT)
- Waaxda Kheyraadka Dabiiciga Ah
- Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Minnesota
- Waaxda Xakameynta Wasakhoowga Degdaanka
- Waaxda Xabsiyada
- Ciidamada Daraawiishta
- Waaxda Nabadgelyada Dadweynaha ee Minnesota. (DPS), qeybta Waaxda Dabdamiska Gobolka (SFM)
- Injineerada Ciidamada Mareykanka (USACE)

“Dhawrkii maalmood ee la soo dhaafay waxaanu aragnay burburka ku dhacay guryaha degaanka iyo goobaha ganacsiga,” ayuu yiri Madaxa DPS Bob Jacobson. “Siyaabo kala dduwan, ma aha mid si fudud lagu maaareyn karo. Taas waxba kama bedeli karno, laakiin waxaanu caawineynaa dadka ay dhibaataadu ka soo gaareen roobabka iyo fatahaadda. Taani ma noqoneyso xal mudada gaaban ah. Halkan waxaanu u joognaa gargaar mudada dheer ah. Si aan u gargaarno, ugu fidino adeegga ay u baahan yihiin xilliga masiibooyinka iyo ka soo kabashada.”

Shaqaalaha SEOC ayaa todobaadka si hoose ula xiriiray hay’adaha degaanka iyo madaxda gurmada xaaladdaha degdegga si u gaarsiyaan adeegyada hoos ku xusan dhulka ay dhibaataada ka soo gaareen fatahaadda gobolka oo dhan:

- Kooxda Maareynta Dhibaataada Degdaanka ee Minnesota oo Dhan, koox horay loo magacaabay ee xaaladaha gurmada ah ee gobolka oo dhan, ayaa caawinaya Degmada Jackson ee maareynta dhacdooyinka.
- USACE waxa ay gaarsiisay 175,000 oo jawaan oo ciid ah iyo matoorada biyaha tuura si loo badbaadiyo kaabayaasha dhaqaalaha ah ee muhimka ah ee Degmooyinka Rice, Le Sueur, Jackson, Rock, St. Louis iyo Blue Earth.
- gudoomiye Tim Walz waxaa uu codsaday Daraawiishta Gobolka Minnesota, iyo 44 askari oo caawinaya Degmada Jackson County ee hawlgalka matoorada biyaha tuura.

- Hay'adda Mutadawiciinta ee Minnesota ee Masiibooyinka waxa ay goobo lagu hoydo ka hirgaliyeen Cook iyo Faribault, xaaqitaanka qashinka burburka iyo khadka 211 ee isku xira bulshooyinka ee adeegga mutadawiciinta.
- Waaxda Xabsiyada ayaa adeegsaday 75 maxbuus oo ku xirnaa xabsiga Faribault in ay gacan ka geystaan dhigitaanka jawaanada ciidda.
- SFM waxa ay xirriiriyeen shan ka mid shaqaalaha gurmada oo ka socda Luverne iyo Minneapolis in ay caawiyaan Waaxda Gurmada ee Jackson iyada oo laba doonyood ay diyaar ku ahaayeen gurmada degdegga ah ee badbaadinta dadka.
- USACE iyo MnDOT oo gacansaar la leh hay'adaha degaanka ee sahaminta iyo qiimeynta kaabayaasha dhaqaalaha ee muhimka ah, oo ay ka mid tahay la socoshada fatahaadda
- DPS waxa ay gacansaar la leedahay [TPT NOW](#) si ay macluumaadka la xiriira amaanka ugu gudbisno dhawr luqadood.

Waxa kale oo gobolku si hoose ula shaqeeyay wakiilada Hay'adda Maareynta Xaaladaha Gurmada ee Dawladda Dhexe, oo booqday goobaha ay masiibooyinku ka dhaceen todobaadkan. Maareynta muhimka ah ee adeegyada waxa ay u fududeyneysaa in gobolku ka soo baxo baahida iminka taagan iyo tan mustaqbalka ee degmooyinka ay dhibaataadu ka soo gaartay fatahaadda.